DSHS
WASHINGTON STATE
Department of Social and Health Services

Qaadista caqabadaha wadahadalka ee horyaalla dadka Dhegoolaha ah • Maqalka Ku Adag • Goor-dambe Dhego-beelay • Dhegoole-Indhoole ah • Hadalka Naafada ka ah

Arjiga Qalabka Isgaarsiinta

Application for Telecommunication Equipment

Xafiiska Dhegoolayaasha iyo Kuwa Maqalka Ku Adag Yahay (ODHH) waxaa uu leeyahay barnaamijka Qaybinta Qalabka Isgaarsiinta (TED). Barnaamijka TED ayaa qalab isgaarsiin gaar ah siiya dadka maqalka beelay ama hadalka naafo ka ah ama ku adag si ay u helaan war-isgaarsiinta fog ama masaafada u jirta.

Dadka deggan Gobolka Washington ee ay da'doodu tahay 4 ama ka weyn ee dhegoolaha ah, maqalka ku adag, goor-dambe dhego-beelay, dhegoole-indhoole ah ama hadalka naafada ka ah waxaa ay xaq u leeyihiin in ay codsadaan in ay helaan qalab isgaarsiin.

Arjiga waxaa la socda macluumaadka aad u baahan tahay si aad u dhammeystirto hannaankan. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta arjiga, waxaad la xiriiri kartaa Barnaamijka TED.

TUSMO

Bogga Hore ee Arjiga....1
Macluumaadka Barnaamijka.....2
Diiwaanka Xogta Qalabka .....4 - 5
Arji .....6 – 8*

* Waa in AAD soo celisaa dhammaan saddexda bog ee foomkan.

Xafiiska Dhegoolayaasha iyo Kuwa Maqalka Ku Adag Yahay
Barnaamijka Qaybinta Qalabka Isgaarsiinta

TED Program
PO Box 45301
Olympia, WA 98504-5301

(800) 422-7930 V/TTY
(360) 725-3450 V/TTY
(360) 725-3456 FAKIS

Telefoon dad isku muuqda ay ka wada hadli karaan: 360-339-7382
E-mail-ka: odhh@dshs.wa.gov
Bogga internetka: http://odhh.dshs.wa.gov

Si aad qalab u hesho, waa in aad:

☐ Buuxisaa Arjiga Qalabka Isgaarsiinta (bogagga 6 - 8).

Arjiga aan dhammeystirnayn waxaa laga yaabaa in uu keeno dib-u-dhaca adeegga.

Waxaan kuu soo diri doonnaa waraaq haddii arjigaagu uusan dhammeytirnayn ama la diido.

☐ Boostada ugu dir Barnaamijka TED cinwaanka kore ama elektaroonig ahaan ugu dir odhh@dshs.wa.gov.

Marka arjigaaga la aqbalo oo laga shaqeeyo, waxaan:

1. Kuu soo diri doonnaa waraaq muujinaysa kharashka qalabka, haddii uu mid jiro.
2. Magacaaga ku dar doonnaa liiska xiga ee qalab qaybinta.
3. Ku siin doonnaa qalabka.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hannaanka arjiga, eeg Su'aalaha Soo Noqnoqda ee ku jira Macluumaadka Barnaamijka (bogga 3aad).

Arjiyada waxaa lagu heli karaa Daabacad Far Waaweyn, Farta Indhooleyaasha ee Braille, iyo luuqado kale.
Waxaad la xiriiri kartaa ODHH si aad u codsato arjiga oo qaab kale ah.

Adeegyada War-lalinta Isgaarsiinta Washington (WATRS)
www.washingtonrelay.com

Qaar ka mid ah qalabka isgaarsiinka gaar ah ayaa lala adeegsan karaa War-lalinta. War-lalinta (Relay) waa adeeg lacag la'aan ah oo dadka adeegsada aaladaha telefoonka gaarka ah ku xiriiriya dadka adeegsada telefoonka caadiga ah, iyo sidaa cagsigeeda.

- Si aad u adeegsato War-lalinta (Relay), kaliya garaac 7-1-1.
- Waxaa lagugu xiriirin doonnaa Qof Ka Shaqeeya War-lalinta /Relay Operator (RO) ama Kaaliya War-Isgaarsiin/Communication Assistant (CA).
- RO ayaa garaaci doonna lambarka telefoonka la wacayo wuxuunna labada qof u kala gudbin doonna wada-dahalka u dhaxeeya.

Su'aalaha Soo Noqnoqda (FAQ)

Dakhligeyga miyuu iga reebayaa in aan helo qalabka iyadoo loo marayo Barnaamijka TED?

Maya. Qof kasta ee ka soo baxa shuruudahan (bogga 1aad) ayaa codsan kara qalabka, iyada oo aan la eegayn dakhligooda.

Ma in aan bixiyaa lacagta qalabka?

Macaamiil badan waxaa ay helaan qalab lacag la'aan ah, laakiin taasi waxaa go'aamisa qoyska inta uu le'eg yahay iyo dakhligiisa. Waxaan adeegsanaa xaddi gees-gees u siqda si aan u go'aamino kharashka qalabkaaga. Waxaan kuu soo diri doonnaa warqad muujinaysa haddii qalabka uu bilaash yahay, ama waxaa ay kuu sheegaysaa qaddarka lagaa rabo.

Waa in aan lacag-bixinta helnaa ka hor inta aan qalabka bixin. **Haddii aadan awoodin in aad bixiso qaddarka lagaa rabo, waxaad codsan kartaa ka-dhaafid.** Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hannaanka ka-dhaafidda, la xiriir barnaamijka TED.

Muxuu yahay dakhliga ay tahay in la soo sheego?

Waa in aad soo sheegtaa dhammaan ama ilo dakhli kasta oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn mushaaraadka, dheefaha naafonimada, dakhliga hawlgabka, damaannada bulshada, iyo dulsaarka.

Waa maxay qalabka aan wax ka dooran karo?

Diiwaanka Xogta Qalabka TED (bogagga 4 - 5) wuxuu muujinayaa noocyada qalabka ee la heli karo. Waxaad dooran kartaa hal (1) aalad isgaarsiineed oo ay la socdaan qalabka dheeraadka ah ee aaladaasi, haddii la heli karo; **iyo** hal (1) aalad baaq bixisa. Waa in aad nooca qalabka ee aad dooneyso ka xulataa arjiga (bogga 7aad, qaybta 3aad).

Waa maxay nooca adeegga telefoonka guriga ee loo baahan yahay?

Macaamiisha codsaneysa in ay helaan Teletypewriter (TTY) ama telefoonka dhawaaqa codka kordhiya ee adeegga telefoonka khadka leenleenka ah ku saleysan. Adeegyada telefoonka xariga ama internet-ka ku saleysan sida kuwa lagu bixiyo Comcast ama Wave Cable ma waafaqsanna telefoonnada TTY; haseyeeshee, waxaa ay ku shaqeyn karaan inta badan telefoonnada dhawaaqa codkooda la kordhiyay.

Su'aalaha Soo Noqnoqda (FAQ) (La sii waday)

Waa maxay xirfadlayaasha loo oggol yahay in ay saxiixaan foomkeyga arjiga?

Calaamadee sanduuqa sharxaya xirfadda shakhsiga saxiixaya foomka arjiga. Xeerka WAC 388-818-010 wuxuu dhigayaa in shakhsiyaadkan soo socda loo oggol yahay in ay xaqiijiyaan xaqu-yeelashada codsadaha:

a. Qof shati u haysta ama ay u aqoonsan tahay Waaxda Caafimaadka in uu bixiyo daryeelka caafimaadka ee Gobolka Washington;

b. Dhakhtarka maqalka ama qofka xira / bixiya qalabka kaaba maqalka ee Gobolka Washington;

c. Takhasuslaha ama isuduwaha mid ka mid ah xarumaha adeegga bushada ee dhegoolaha iyo qofka maqalka ku adag yahay ee gobolka;

d. Hay'ad-aan faa'iido doon ahayn kasta ee gobolka ka shaqeysa oo u adeegta dadka hadalka ama maqalka naafada ka ah.

e. Shaqaalaha ka socda adeegga Gobolka Washington ee u qalma;

f. La-taliyaha xirfad ama mihnad barashada ee Gobolka Washington gudahiisa;

g. Isuduwaha ama xeer-dheere ku takhasusey arrimaha dhegoolka-indhoolaha ee hay'ad u adeegta dadka dhegoolaha-indhoolaha ah ee ku dhaqan gudaha Gobolka Washington;

h. Daaweeyaha shaqada ee shatiilaha ah ee ku sugan gudaha Gobolka Washington;

i. Dakhtarka hadalka ee la xaqiijiyay ee ka shaqeeya Gobolka Washington; ama

j. Kuwo kale: ku qor xirfadaada kuna dar macluumaadkaaga xiriirka ee loogu talagalay xaqiijinta barnaamijka.

Waxaan horey u helay qalab. Miyaad dib mar kale u codsan karaa qalab cusub?

Waxaad xaq u leedahay in aad qalab cusub codsato ka-dib (3) sano **kaliya haddii** qalabkaaga hadda ee Barnaamijka TED uusan shaqeynaynin **ama** uusan buuxin baahiyadaada. Haddii aad kharash la'aan ku heshay qalabka, waxaa lagaaga baahan karaa in aad qalabkaasi soo celiso ka hor inta aanan qalab cusub ku siinin. Waxaad la xiriiri kartaa Barnaamijka TED haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah.

Goormee ayaan qalabka heli doonnaa?

Hannaanka lagu helayo qalabka ayaa qaadan kara afar (4) ilaa sideed (8) toddobaad oo ku xiran liiska alaabta la heli karo. Qalabka intiisa badan ayaa si toos ah adiga laguugu soo dirayaa. Qalabka takhasusiga ah qaarkood waa in uu kuu keenaa tababbar TED oo qandaraasle ah.

Haddii qalabka uu adiga tababbare kuu keenayo, way kuula soo xiriiri doonnaan si aad u qorsheysaan taariikhda iyo waqtiga ay la kulmayaan adiga iyo dadka kale ee laga yaabo in ay daneynayaan. iPads iyo iPhones intooda badan ayaa waxaa si toos ah macmiilka ugu diri doonno iibiye qandaraasle ah iyadoo loo marsiinayo UPS waxaanna loo baahan doonnaa saxiix si shixnadaasi loo helo.

Barnaamijka TED ayaa ku bixiya adeegyada alaab-geynta iyo tababbarka si lacag la'aan ah.

Diiwaanka Xogta Qalabka Isgaarsiinta

Qaybtan waxaa ay codsadayaasha iyo xirfadlayaasha ka caawinayaa xulashada qalabka ugu habboon si loo haqabtiro baahiyada codsadaha.

Nooca qalabka waa in laga xushaa arjiga.

Codsadayaasha waxaa ay xaq u leeyihiin in ay helaan waxyaabahan soo socda:

Hal (1) aaladda isgaarsiinta **lyo** **hal (1)** aalad baaq bixisa.
La socda qalabka dheeraadka ah ee aaladaasi, haddii la heli karo.

- Qalabka lagu muujiyay ama la dulsaarey calaamadda xiddigta (*) waa in uu keenaa tababbar xirfad iyo aqoon leh. Lama soo diri doonno. Codsadayaasha doortey qalabkaasi waxaa si otomaatik ah loogu diri doonnaa tababbaraha.
- Dhammaam moodeellada waxaa ku waajiba beddel.

Qalabka Isgaarsiinta Takhasusiga a

Telefoonka Dhawaaqa Codkiisa La Kordhiyay

Loogu talagalay shakhsiyaadka leh maqal la'aanta heerka fudud ilaa heerka dhexdhexaadka ah.

- U shaqeeya sida telefoonka caadiga ah.
- Isticmaala qalab codka kordhiya si loo maqlo hadalka lagu hadlo.
- Hagaaji heerka iyo tayada codka si looga soo baxo baahiyada gaarka ah.

<u>Moodeelo xarig ama fiilo wata ayaa la heli karaa</u>:

- Clarity Alto
- Clarity Alto Plus oo leh aqoonsiga wacaha

<u>Moodeelo xarig ama fiilo la'aan ah ayaa la heli karaa</u>:

- Panasonic KX-TGM403B oo leh aqoonsiga wacaha

<u>Qalabka dheeraadka ah</u>:

- Neck Loop (NKL)

iPad ama iPhone – La heli karo iyagoo leh ikhtiyaarada internetka telefoonka gacanta ama kan WiFi oo kaliya*

Si aad u hesho isgaarsiin internetka telefoonka gacanta iyo WiFi ku shaqeeya.

Aaladaha iPad iyo iPhone ayaa la bixiyaa iyaga oo leh gal difaac (loo baahan yahay si loo ilaaliyo damaannada). Macaamiishu waxaa ay leeyihin ikhtiyaarka iPad, iPad Mini, ama iPhone. Aaladaha ayaa si gaar ah loo qaybiyaa si isgaarsiinta loogu bixiyo shabakadda internetka telefoonka gacanta ama WiFi waxaanna kuu soo diri doonna Iibiyaha Qandaraaslaha ah.

Teletypewriter (TTY)

Shakhsiyaadka leh maqal la'aanta iyo/ama naafonimada hadalka ee qoto-dheer ama gebi ahaanta ah.

- Ku xiriira qoraal.
- Farriimaha ayaa ka soo muuqda shaashadda soo bandhigidda sidoo kalena waa la daabici karaa.
- Wada-sheekaysiga waa hannaan qofba tookadiisa qaata.
- Waxaa uu u baahan karaa isticmaalka Adeegga War-lalinta Washington.
- Waxaa uu u baahan yahay adeegga telefoonka khadka leen-leenka analog aasaasiga ah.

TruTone Emote Electrolarynx

Shakhsiyaadka ah bukaanno laga saarey sanduuqa codka.

- Isticmaal Qalabka Elektarooniga ah ee Kaaba Hadalka si aad u hadasho.
- Sanduuqa codka ee macmalka ah ayaa saamaxa kor iyo hoos u yeerka codka oo dabiici ah marka la hadlayo.
- Si toos ah macaamiisha loogu diro.
- Waxaa laga adeegsan karaa Adeegga Hadal-ilaa-Hadalka ee War-laliska Washington.

Qalabka kale ee isgaarsiinta takhasusiga ah ayaa waxaa heli kara shakhsiyaadka baahiyada gaarka ah leh. La xiriir Barnaamijka TED haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah (eeg macluumaadka xiriirka ee ku qoran bogga 1aad).

Aaladaha Caawimaadda Leh ee Bixiya Digniin Muuqaal ama Gariir ah

Aaladda Caawimaadda Leh ee Bixisa Digniin Muuqaal ama Gariir ah oo La Maqli Karo

- Aaladaha caawimaadda leh ee bixiya digniin muuqaal ama gariir ah ayaa dhawaaqa marka uu yeero telefoonka leen-leenka ah.
- Hagaaji heerka codka yeeraha si loo haqabtiro baahiyo gaar ah.

Aaladda Caawimaadda Leh ee Bixisa Digniin Muuqaal ama Gariir ah oo Iftiin leh

- Ku xiriirta nal.

Nalka ayaa bilig-leeya marka telefoonka uu soo dhaco.

Afeef: Magaca shirkad gooniga ah / moodeellada waxaa ku waajiba beddel.

DSHS WASHINGTON STATE Department of Social and Health Services

Arjiga Qalabka Isgaarsiinta
Application for Telecommunication Equipment

Office Use Only (ADEEGSIGA XAFIISKA OO KELIYA)
Date Received

Arjiyada aan dhammeystirnayn waxaa laga yaabaa in la soo celiyo waxaa ayna keeni karaan dib-u-dhaca adeegga.

Fadlan hubso in dhammaan godadka "**loo baahan yahay**" la buuxiyay. **Daabac ama si cad u qor.**

Marka aad buuxiso arjiga, **ka jeex bogagga 6aad ilaa 8aad, ka-dibna boostada ugu dir**: TED Program
PO Box 45301
Olympia, WA 98504-5301

Sidee ku maqashay barnaamijka TED?

☐ Saaxiib ama xubin qoys ☐ Majallad ama wargeys
☐ Xirfadle caafimaad ☐ Soo-bandhigid ama qol macluumaad
☐ Xayaysiin telefisiyoon ☐ Kale:

Horey qalab ma uga heshay Barnaamijka TED?

☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma garanayo

Jeexo ama rufsiiso arjiga

Qaybta 1aad. Macluumaadka Codsadaha

1. Magaca dambe, magaca koowaad, xarafka hore ee magaca dhexe			2. Jinsiga ☐ Lab ☐ Dhedig ☐ Kale:
3. Cinwaanka guriga (kuddar lambarka abaarmanka)	Magaalada	Gobolka	Sumadda Degaanka
4. Cinwaanka boostada (haddii uu ka duwan yahay)	Magaalada	Gobolka	Sumadda Degaanka
5. Magaca Bulshada / Xarunta (t.a., guriga bukaanka lagu xannaaneeyo, abaarmantiyo isku xirxiran)			6. Degmada
Lambarka telefoonka (kuddar koodhka degaanka) ☐ Cod ☐ VP ☐ TTY			8. Lambarka teleefoonka gacanta (kuddar sumadda degaanka) ☐ Cod ☐ VP ☐ TTY
9. Cinwaanka E-mailka			10. Waqtiyada ugu wanaagsan ee lala xiriirayo
11. Lambarka Damaannada Bulshada (ikhtiyaari)			12. Taariikhda Dhalashada (loogu baahan yahay xaq-u-yeelasho)

13. Qofka kale ee lala xiriirayo / farriinta Magaca:	Xiriirka
Lambarka telefoonka (kuddar koodhka degaanka) ☐ Cod ☐ VP ☐ TTY	Cinwaanka E-mailka

Qaybta 2aad. Warbixinta Qofka

1. **Macluumaadka maaliyadeed (loo baahan yahay):**
   Inta uu la'eg yahay qoyska: Dakhliga bil kasta: $ Dakhliga sannad kasta: $

2. Naafonimo (loogu baahan yahay xaq-u-yeelashada)
   ☐ Dhagoole ☐ Dhagoole-Indhoole
   ☐ Maqalka makugu adag yahay?
   ☐ Hadalka Naafo ka ah
   ☐ Goor-dambe Dhego-beelay

3. Ka sokow maqal la'aanta ama naafonimada hadalka:
   a. Ma leedahay aragga oo hooseeya? ☐ Haa ☐ Maya
   b. Indhoole ma tahay? ☐ Haa ☐ Maya
   c. Ma leedahay dhaqdhaqaaq xadiddan? ☐ Haa ☐ Maya

4. Dookhyo wadahadal
   a. Luuqadda dhegoolayaasha: ☐ ASL ☐ PSE ☐ EEG ☐ Tactile
   b. Hadley: ☐ Hadalaya ☐ Dibna akhrin
   c. ☐ Qoraalaya
   d. ☐ Mid Kale: _____
   e. Waa maxay luuqadda aad ku hadasho?
      ☐ Af-Ingiriis ☐ Af Kale: _____
   f. Ma u baahan tahay turjumaan? ☐ Haa ☐ Maya

5. Ma tahay qof asal ahaan Hisbaanik ah? ☐ Haa ☐ Maya

Su'aasha Isbaanishka / Hisbaanik / Laatino waxaa ay ku saabsan tahay sinjiga, ma ahan mid khuseysa isirka. Fadlan sii wad in aad ka jawaabto su'aashan soo socota adiga oo calaamadinaya hal sanduuq ama in ka badan si aad u muujiso waxa aad u aragto in isirkaaga uu yahay (calaamadee dhammaan kuwa ku habboon):

☐ Caddaan ☐ Hinddida Mareykanka ama Alaskaan Dhallad ah
☐ Hawaayaan dhalad ah ama Dadka Ka-soo-jeeda Jasiiradaha Baasifigga
☐ Madow ama Afrikaan Mareykan ah ☐ Aasiyaan ☐ Isir kale

Qaybta 3aad. Xulashada Qalabka

Xulo hal aalad isgaarsiin iyo hal aaladda caawimaadda leh ee bixisa digniin muuqaal ama gariir ah.

Telefoonka Guriga ee Codkiisa La Kordhiyay (adeegga leen-leenka ayaa loo baahan yahay):

☐ Telefoon xarig ama fiilo ah oo leh Aqoonsiga Soo Wacaha ☐ Telefoonka Codkiisa La Kordhiyay ee Xariga/Fiillada Lahayn

☐ Telefoon Xarig ama Fiilo lehCorded Phone – Aan Lahayn Aqoonsiga Soo Wacaha

Telefoonka Guriga ee Farriinta Ku Saleysan (adeegga leen-leenka analoogga ah ayaa loo baahan yahay):

☐ Teletypewriter (TTY)

Aaladaha Aan Fiillooyinka Lahayn (* Aaladaha telefoonka gacanta kuma xaddidna hal shirkad bixiya adeegga internetka waxaad ku adeegsan kartaa shirkad kasta ee bixisa adeegga la jaanqaadaya. Kharashka adeegga telefoonka gacanta waa mas'uuliyadda macmiilka oo ma caymiyo Barnaamijka TED.):

☐ iPad ☐ iPad Mini ☐ iPhone

** Aaladaha iPad waa WiFi oo Kaliya. Haddii macmiilka uu u baahan yahay iPad ku shaqeeya internetka telefoonnada, halkan eeg: ☐ Internetka telefoonka ku shaqeeya,* **iyo** bixi sababta codsiga gaarka ah:

_____

Magaca shirkadda telefoonka gacanta: _____

Aaladaha Baaqa Bixiya – telefoonnada leen-leenka oo kaliya. Aan la jaanqaadin aaladaha aan fiilooyinka lahayn ee wireless-ka ah.

☐ Qalabka Dhaawa Aadka ah Bixiya ☐ Qalabka Bilig-leeya

Aaladaha Takhasusiga ah ayaa waxaa heli kara macaamiisha leh Naafonimooyinka Hadalka.

☐ TruTone Emote ElectroLarnyx ☐ Kale: _____

Qalabka ayaa si toos ah loogu diraa macmiilka.

Marka aad saxiixdo Qaybta 4aad ee hoose, waxaad Xafiiska Dhegoolayaasha iyo Kuwa Maqalka Ku Adag Yahay u oggolaanaysaa in ay magacaaga, cinwaankaaga boostada, macluumaadka xiriirka iyo naafonimada uu qofku soo sheego ee lagu bixiyay arjigan ay siiyaan iibaha qandaraaslaha ah iyadoo ujeeddadu tahay soo diridda qalabka iyo bixinta damaannad iyo adeegyada taageerada farsamo.

Qaybta 4aad. Saxiixa Macmiilka

Waxaan fahamsanahay in qalabka aan lacag la'aanta ku helo in uu deyn igu yahay oo uu sii ahaanayo hanti uu Gobolka Washington leeyahay.

Waxaan fahamsanahay in aan ku khasbanahay in qalabka aan la ilaaliyo waxyeello. Waa in aan ka ilaaliyo waxyeellada ay u geysan karaan roobka, kuleylka, iyo xadgudubka jireed.

Waxaan fahamsanahay in haddii aan si khaldan u isticmaalo qalab, waxaa laga yaabaa in aanan xaq u lahayn in aan helo qalab beddel ah.

Haddii qalabka **uu lumo ama la xado**, waxaan u sheegayaa Barnaamijka TED, Waxaan sidoo kale u sheegayaa booliska. Waxaan fahamsanahay in nuqulka warbixinta booliska aan siiyo Barnaamijka TED.

Haddii aan guuro, Waxaan ogeysiin doonnaa Barnaamijka TED cinwaankeyga cusub iyo lambarkeyga telefoonka.

Haddii aan ka guuro Gobolka Washington, waxaan fahamsanahay in ay dhici karto in aan celiy qalabka TED ka hor inta aan ka tagin Gobolka Washington.

Waxaan fahamsanahay in aanan iibin karin, aanan ugu faa'iideyn karin, ama aan qalabka amaahin karin qof walba sabab kasta.

Haddii qalabka uu **jabsan yahay**, waxaan isku-dayi doonnaa in aan aniga nafteya hagaajiyo. Waxaan la xiriiri doonnaa Barnaamijka TED si aan uga helo tilmaamaha.

Waxaan fahamsanahay in haddii aan dhibaato ku qabo iPad, dhammaan adeegyada waxaa sameynaya Wakiilka Barnaamijka TED ama "Teltex" iyadoo la adeegsanayo tilmaamaha lagu bixiyay gudaha/dusha sanduuqa iPad.

ku saabsan iPadka Barnaamijka TED.

Waxaan fahamsanahay in aanan geyn karin iPad-ka Dukaanka Apple oo ulama xiriiri karo Apple Care caawimaadda

Waxaan fahamsanahay in iPadka ay tahay in lagu hayo galka lagu ilaaliyo ee uu ku yimaado.

Waxaan fahamsanahay in iPadka loo bixiyay ujeeddooyin wadahalka fog.

Waxaan caddeynayaa si waafaqsan ciqaabta been-ku-dhaarashada ee ku cad shuruucda Gobolka Washington ee ah in macluumaadka foomkan ku qoran in uu yahay mid run ah oo sax ah.

1. Sixiixa	Taariikh
2. Qofka buuxinaya arjiga (haddii uusan ahayn codsadaha) Magaca	Xiriirka
Lambarka telefoonka (kuddar koodhka degaanka) ☐ Cod ☐ VP ☐ TTY	Cinwaanka E-mailka

Qaybta 5aad: Shahaaddo Xirfadeed

Xirfadle waa in uu saxiixaa arjiga si uu u xaqiijiyo maqal la'aanta ama naafonimada hadalka.

Tilmaamo ku socda "Xirfadlaha": Waa in laguu oggol yahay in aad ka shaqeyso Gobolka Washington si aad u xaqiijiso maqal la'aanta ama naafonimada hadalka ee codsadaha. **Marka aad xagga hoose saxiixdo, waxaad caddeynayaa in aad ka warqabto ilaa xadka maqal la'aanta ama naafonimada hadalka ee codsadaha waxaadna aaminsan tahay in codsadaha uu ka faa'iidi karo qalabka lagu codsadey Qaybta 3aad ee kore.**

La xiriir Barnaamijka TED haddii codsadaha uu u baahan yahay aalado isgaarsiin gaar ah.

1. Macluumaadka xirfadlaha:	2. Shahaaddo xirfadeed Sixiixa Taariikh
☐ Dhakhtar ☐ Qofka Xira / Bixiya Qalabka Kaaba Maqalka ☐ Dhakhtarka Maqalka ☐ Shaqaalaha Hay'adda Gobolka ☐ Khabiirka Ku-xeeldheer Dhegoolaha ☐ La-taliyaha Tababbarka Mihnadeed ☐ Wakiilka Hay'adda Aan Faa'iidada u Shaqeyn ☐ Khabiirka Ku-xeeldheer Dhegoolaha-Indhoolaha ☐ Daaweeyaha Shaqada ☐ Dhakhtarka Hadalka ☐ Kuwo kale:	Magaca qoran iyo jagada
	Lambarka telefoonka
	Ciwaanka Email-ka
Macluumaadka xiriirka xirfadlaha ee loo baahan yahay (lambarka telefoonka iyo/ama cinwaanka emailka) ee qiimeynta barnaamijka.	Lambarka shatiga / shahaaddada (haddii la adeegsan karo)